



U-shintiriska 'Countdown' oo Kooban

- ◀ Kula kulan maamulayaasha iyo macallimiinta dugsiyada, oo fiiri shaqada ay ardaydu ku gabato dugsiyada adoo tagaya bandhigiyada 'Showcase in Our Schools' ee lagu gabto dugsi kasta ee xannaano, hoose, iyo dhexe 'K-8 school' taariikhdu markay tahay Diisambar 5, 2015.
- ◀ Soo booqo dugsiyo dheeraad ah Xilliga Sahaminta Dugsiyada (School Preview Times) 7da Diisambar, 2015 ilaa 22ka Jeenaweri, 2016.
- ◀ Waxaannu adiga kugu dhiri-gelineyna inaad foomka diiwaangelinta ku liis-gareyso ugu yaraan shan dugsi oo aad doranayo (ka badanna way fiican tahay) oo aad soo gaadatana dhammaan dhokumantiga lagaa rabo.
- ◀ Haddii aad is-goreyso fasalka K2 oo aan lugadda Ingiriisiga ahayn lugaddaada koowaad ama lugad kale lagaga hadlo gurigaaga, marka aad joogto Xarunta 500-dhaweynta, waxa ilmaaga iyo gaban doonaa Ballan ah Qiimeynta Luqadda Ingiriisiga oo lagu gaadi doono Xarunta Qiimeynta iyo La-talinta ee Ardayda Cusub (NACC). Hawsha diiwaangelinta waxay kugu gaadan doonta laba boogasho/jeer.
- ◀ Qiyaastii waqtii u dhaxeya April ilaa Juun ayaa dugsiya cusubi ee ilmaaga idinku martiqaadi doonaana kulan 500-dhaweyn ah oo aad ku boogato fasallada, la hadasho maamulaha iyo macallimiinta, oo aad la kulanto goysaska kale ee cusub.
- ◀ Noogu imow xafidada Maalinta Xannaanada "Kindergarten Day party" ee Maktabadda xaafaddada.
- ◀ Calaamadi Xusuus-gorahaaga Dabbaaldega Sannadlaha 17aad ee U-shintiriska Xannaanada (17th Annual Countdown to Kindergarten Celebration) ee Matxafka Ilmaha ee "Boston Children's Museum".
- ◀ Meeleynta Baska 'bus assignments' waxa boostada lagu diri doonaa aakhirka bisha Ogos.

NOOFEMBAR - JEENAWERY

5 Soo Booqo oo Dooro Dugsiyo

JEENAWERY

4 Is-Diwaangelinta Dugsiyada

MAARIJ - JUUN

3 La Kulan Dugsiyaaga

JULAY - OGOS

2 U-diyargaraw Dugsiya

- ◀ Qoysaska ilmahooda qoraya fasalka 'kindergarten' ee Sannad dugsiyada kala baxaan barta Internetka ee "www.DiscoverBPS.org".
- ◀ Wareegga koowaad - Jeenawery 4, 2016 - Jeenawery 29, 2016) Soo booqo Xarun 500-dhaweyn si aad is diiwaangeliso. Waxaad dhageysan kartaa waqtii xilliga boogashadaada haddii aad horey isaga sii diiwaangeliso Internetka adoo isticmaalaya barta <https://sis.mybps.org>.
- ◀ Qoysaskii is-diiwaangeliley wareeggi koowaad (Jeenawery 4 - Jeenawery 29, 2016) Caadi ahaan dhammaadka bisha Maaraj ayey boostada ku helaan waraaqaha dugsiya lagu qoray.
- ◀ Ogow inaad funaanad bilaash ah (free T-shirt) ka gaadatiid maktabadda xaafaddaada oo raadina xafidada kale ee bilaashka ah ee loogu talagalay goysaska fasalka xannaanada 'kindergarten' ee ka jira magaalada oo dhan.



La Xiriir

phone numbers

Countdown to Kindergarten.....(617) 635-6816 or (617) 635-9288
 Dugsiyada Dadweynaha Boston(617) 635-9000
 Guddiga Dugsiyada Boston.....(617) 635-9014
 Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga(617) 635-9435
 Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada.....(617) 635-9144
 Shabakadda Agabka Waxbarashada Hoy laawayasha(617) 635-8037
 Xarunta Qiimeynta iyo La-talinta Ardayda Cusub (NACC): (617) 635-1565
 Xafiiska Xiriirinta(617) 635-7750
 Talafoonka 24-Saac (Jeenawery, Ogos iyo Sibtambar) (617) 635-9046
 Waxbarashada Gaarka ah.....(617) 635-8599
 Gaadiidka(617) 635-9520

websites

Countdown to Kindergarten
www.countdowntokindergarten.org
 Discover BPS
www.discoverbps.org
 Online Pre-registration
<https://sis.mybps.org>
 Boston Public Schools
www.bostonpublicschools.org
 BOSTONavigator
 (ku raadi barnaamijyada Waqtiga Ka Baxsan xilliyada iskuulka)
www.bostonnavigator.org
 Talk, Read, Play
www.talkreadplay.org
 Office of Engagement
www.bostonfamilies.org

Boston Public Schools Kindergarten REGISTRATION GUIDE

2016-2017

Jeegareynta Diiwaangelinta

- TALAABO 1:** Inaad hesho liiska dugsiyada, soo booqo barta internetka www.discoverBPS.org
- TALAABO 2:** Isasii diiwaangeli adigoo isticmaalaya nidaamka internetka ee 'SIS System': sis.mybps.org/asp/en/index.html
- TALAABO 3:** Soo qaado waraaqaha soo socda
 - Warqadda dhalashada ee orijinaalka ah ee ilmaha, Foomka I-94, ama baasaboort*
 - Rikoorka tallaalka ilmaha oo ah kii ugu dambeeyey
 - Aqoonsiga sawirka leh ee Waalidka/Koriyaha
 - Iyo laba waxyaabood (two documents)oo kuwan ka mid ah:
 - Waraaqaha degannaanshaha guriga. Waa in hore loo daabacay iyagoo leh magaca iyo cinwaanka hadda ee waalidka/koriyaha.
 - Biilka nalka iyo korontada/gaaska (maya biilka biyaha ama talafoonka gacanta) oo taariikhdiisu tahay 60 maalmood gudahood
 - Heshiis kiro, heshiis 'section 8', ama marqaati degganaansho ee BPS "residency affidavit"
 - Mulkiyad ama Noolo-osto guri oo taariikhdiisu tahay 60 maalmood gudahood, ama biilka cashuurta guriga oo illaa sannadkii hore ah
 - Foom 'W2' ah oo taariikhdiisu tahay sannadkan gudihisa, ama resiidhka mushaharka oo taariikhdiisu tahay 60kii maalmood ee u dembeeyey
 - Warqad ka socota hay'ad dawladeed oo la aqbalay* oo taariikhdeedu tahay 60 maalmood gudahood
 - Warqadda baanka ama kaarka amaahda 'credit card' oo taariikhdiisu tahay 60 maalmood gudahood
- TALAABO 4:** Soo booqo Xarumahayaga Soo-dhaweynta
- TALAABO 5:** Su'aalo? 617-635-6816. Soo booqo barta: www.countdowntokindergarten.org

Maalinta Koowaad ee Fasalka Xannaanada "First Day of Kindergarten" ee Dugsiyada Dadweynaha Boston caadi ahaan waxay bilaabataa maalinta ee ka dembeysa Maalinta Shaqaalaha (Labor Day), laakiin dugsiyada qaar waxa laga yaabaa inay bilaabaan waqtii kaas ka horeeya. Soo booqo bartayada Internetka wixii macluumaad ah ee soo kordha.

1 Dugsiya Bilow!

SIBTAMBAR



Diiwaangelinta Dugsiyada

Qof?


- 5 jirka ka hor Sibtambar 1, 2016, waa u qalmaa/qalantaa fasalka K2 Kindergarten ee Dugsiyada Dadweynaha Boston.
- 4 jirka ka hor Sibtambar 1, 2016, waa u qalmaa/qalantaa fasalka K1 Kindergarten ee Dugsiyada Dadweynaha Boston.
- 3 jirka ka hor Sibtambar 1, 2016, waa u qalmaa/qalantaa fasalka K0 Kindergarten ee Dugsiyada Dadweynaha Boston.

Kuraasta fasallada K1 iyo K0 lama ballan qaadayo

U fiirso in kastoo ay dugsiyada BPS isku dayaan inay ardayda ku meeleeyaan dugsiyada ay doortaan qoysaskoodu, taasi maah mid dhici karta mar kasta. Codsadayaasha fasalka K2 waxay dooran karaan in maamulku ballanqaado meeleeynta ardayga si ay kursi u helaan dhammaadka wareegga koowaad ee diiwaangelinta. Ilmaha gaara lix jir marka la gaaro Diisembar 31 waxa lagu meeleyn doonaa kursi fasalka kindergarten ah haddii la waayo dugsiyada waalidku doortay.

Xaggee?

Waxaad diiwaangelin hore ka sameyn kartaa barta Internetka ee <https://sis.mybps.org> laakiin fadlan xasuuso inaad u baahan tahay inaad dhammeystirto is diiwaangelinta adigoo soo booqanaya Xarunta Soo-dhaweynta oo soo qaadanaya dhammaan waraaqaha loo baahan yahay. Haddii ilmahaagu uu galayo fasalka K2 oo luqadda Ingiriisiga aanay ahayn luqadda koowaad ee ilmahaaga, habka diiwaangelintaada waxa ka mid noqon doona booqasho kale oo aad ku tagto Xarunta Qiimeynta iyo La-talinta Ardayda Cusub (NACC) si loo sameeyo qiimeeyn luqaddiisa Ingiriisiga iyo taloosiin xagga xulashada dugsiyada.



Waa Maxay Sababta Loo Doorto BPS?

Qoysaska Boston waa kuwo nasiib badan uleh kala doorasho dheerada tacliinta ilmahooda marka loo badi mareykanka y-oo waliba waxaad Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) ka heli kartaa kala doorashada ugu wacan uguna xiisaha badan magaaladeenna. Min fasalka xannaanada illaa dugsiyada dhexe illaa dugsiyada sare, dugsiyadeennu waxay bixiyaan khibrado tacliineed, bulsho iyo dhaqameed oo fiiro gaara looga yeesho waddanka.

Kala Doorashooyinkaaga badan waxa ka mid ah:

- Barnaamij xannaano 'kindergarten' baahsan oo leh Fasalka 'K2' oo maalin buuxda ah oo loo ballan qaaday dhammaan ilmaha shan jirka ah, in ka badan 2,700 kursi ee ilmaha afar jirka ah, iyo iskuul-maalmeed la dheereeyey oo logu tala galay ardayda yaryar, oo uu ku jiro barnaamij 'Montessori' ah.
- Koror tirada barnaamijyo 'kindergarten' illaa fasalka 8 (K-8), dugsiyo 'innovation' ama cubeyneysiin ah, dugsiyo 'pilot' ama 'tijaabo' ah, iyo dugsiyo 'charter' ah oo ka jira dhammaan dhincayada magaalada.
- Dugsiyo leh barnaamijyo ardayda garashada ah ee hibada leh, waxbarashada, barnaamijyo Bartayaasha Luqadda Ingiriiska, iyo ardayda naafanimada leh.
- Waxaannu leenahay fasallo arday tiro yar, oo dhiganta qaar badan dugsiyada ku yaalla duleedka ama xaafadaha bannaanka magaalada 'suburban schools'. Fasalka xannaanada 'kindergarten' illaa fasalka 2, tirada fasalka ee u badani waa 22 arday.

Adigu waad ku mahadsan tahay inaad qoyskaaga u doortay Dugsiyada Dadweynaha Boston. Waxaanu rajeyneynaa inaanu ka badinno filashadayada oo aannu noqonno lamaanahaaga inaanu ilmahaaga u diyaarinno guul min fasalka 'kindergarten' illaa dugsiyada sare iyo wixii ka dembeeya.

Doorashada Dugsiga

Qaabka ku meeleeynta Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay ku saleysan tahay qorshaha Guriga Ku-saleysan ee ardayda min fasalka xannaanada illaa fasalka siddeedaad. Waa mid loo qaabeeyey inay ardayda ka caawiso inay galaan dugsiyo tayo leh oo u dhow guriga.

Qorshaha dugsiyada ee Guriga Ku-saleysan wuxuu:

- Kordhiyaa jaanis ama fursadda uu qoysku ku helo mid ka mid ah kuwa ugu horreeya dugsiyada ay doortaan.
- Kordhiyo helidda guud ee dugsiyo tayo leh
- Hubiyo in arday kasta oo galaya fasalka 'kindergarten' uu helo dugsiyo tayo leh oo uu kala doorto
- Boqolkiiba 40% hoos u dhigaa masaafadda uu ilmuhu u socdaalo dugsiyada

Ka hor diiwaangelinta bisha Jeneweri, qoysasku waxay yeelan doonaan fursado inay ka qeybgalaan xilliga Doorashada Dugsiga iyagoo isticmaalaya Qorshaha Guriga Ku-saleysan:

- Soo booqo barta Internetka ee "DiscoverBPS.org" oo hel liiska dugsiyada oo si gaar ah loogu taxay qoys kasta iyadoo lagu saleynayo cinwaanka gurigooda iyo fasalka ardayga. Liiskaas waxa ku jira dugsi kasta oo guriga u jira hal mayl, iyo kolba sida loogu baahdo, dugsiyada u dhow oo horumar wax iyo kobac gaaray marka loo eego imtixaanka MCAS. Ee ardadu gasho.

- Ka qeybgal Bandhigga Dugsiyadeenna ee Diisembar 5, 2015 min 9 AM-1 PM. Dhammaan dugsiyada leh fasalada Kindergarten illaa 8 waxay u furnaan doonaan si ay u soo dhaweeyaan qoysaska doonaya inay soo booqdaan iskuulka ka hor inta aanay go'aansan Dugsiga ay dooranayaan.

- Haddii aad fursad u weydo inaad soo wada booqato dhammaan dugsiyada ku qoran liiskaaga Diisembar Steeda, waxaad dugsiyo kale soo booqan kartaa xilliga Soo Fiirinta Dugsiyada ee bilaabmeysa Diisembar 7, 2015 illaa Jeenawery 22, 2016.

Ka dhammeystir diiwaangelinta xarun ka mid Xarumaha Soo-dhaweynta ee goobaha soo socda:

Dorchester Campbell Resource Center 1216 Dorchester Ave. Dorchester, MA	Roslindale Jennie Barron Bldg. 515 Hyde Park Ave., Roslindale, MA
Mattapan Mildred Ave K-8, Rear Entrance 5 Mildred Ave., Mattapan, MA <i>Furan Khamisaha iyo Jimcayaasha, 8:30 subax.-5 galab.</i>	Roxbury Bruce C. Bolling Building (Dudley Sq) 2300 Washington St., 2nd FL, Roxbury, MA
East Boston Mario Umana Academy 312 Border St., East Boston, MA Furan Isniinaha iyo Talaadooyinka, 8:30 subax - 5 galab. Bisha Jeenawery waa jadwalka Arbacada	
Xarunta Qiimeynta iyo La-talinta Ardayda Cusub (NACC) Bruce C. Bolling Building (Dudley Square) 2300 Washington St., 2nd FL, Roxbury, MA (617) 635-1565 Saacadaha shaqada: Maalmaha shaqada 9:00 Subax – 5:00 Galab Waa inaad marka hore tagtaa Xarunta Soo-dhaweynta si aad u sameysato ballan aad ku tagto qiimeynta.	

Goor?

Xilliga diiwaangelinta koowaad waa min Jeenawery 4, 2016 illaa Jeenawery 29, 2016, iyadoo la raacayo jadwalka xarfaha 'alphabetical schedule' (hoos ku qoran). Is-diiwaangeli xilligan si aad u heshid fursadda ugu wacan in lagugu meeleeyo mid ka mid ah dugsiyada aad rabtid. **Iyadoo la raacayo magaca dembe ee waalidka/koriyaha:**

**A-I: Jeenawery 4-8 | J-Q: Jeenawery 11-15
R-Z: Jeenawery 19-22 | Dhammaan Jeenawery 25-29**

Diiwaangelinta Hore waxay bilaabantaa bartamaha Diisembar oo waxay socotaa illaa Jeenawery. Ilmahaaga waxaad hore uga sii diiwaangelinkartaa barta Internetka <https://sis.mybps.org>!

Isu diyaarinta dugsiyada

La hadalka, u akhriska iyo la ciyaarka ilmaha sannadaha hore waxay ka caawiyaan inay wacnaadaan oo waxay ku ridaan waddada guusha dugsiyada. Magaalada Boston waxay "ilmo diyaar u ah dugsiyada" ku qeexdaa inuu yahay mid:

1. Si wanaaga ula macaamila ilmaha ama dadka waaweyn ee kale;
2. Wax u fiirsada oo jecel inuu barto waxyaalo cusub;
3. Dhug yeelan kara, dhageysta ama u fiirsada qof ama waxa socda;
4. Isku faraxsan;
5. Maamuli kara ama hanan kara (celin kara) caadifaddiisa;
6. Caafimaad qaba, oo ammaan leh, oo nasasho badan helay, oo si fiican u nafaqaysan;
7. Leh aqoon ku habboon;
8. Leh xirfado luqadeed oo habboon; iyo
9. Leh xirfado jireed oo habboon.

Adigoo saddex wax la sammeynaya ilmaha_sida la-hadal, la-akhrin, la-ciyaar_ayaad ilmahaaga ku caawin kartaa inuu diyaar u noqdo dugsiyada

